



MARKA ILMAHAAGA LAGU MEELEEYO MEEL KA BAXSAN GURIGA

**Waalidiinta ayaa ka mas'uul ah
kharashaadka caruurtooda**

Adiga ayaa ka mas'uul ah kharashaadka caruurtaada

Dhamaan waalidiinta ayaa ka mas'uula kharashaadka caruurtooda iyada oo aan loo eegayn hadii u ilmaha la degen yahay ama uyahay daryeelhaye.

Marka ay hay'adda adeega bulshada ay caruur ku meelayso guri reer, guri si loogu daryeelo ama deegaan (HVB) ama deegaan taageero adiga waalida ah waxa kugu waajiba inaad siiso degmada khidmad. Xeerku waxa uu khuseeyaa iyada oo aan loo eegayn sababta caruurta loogu meeleeeyey meel kabxasan gurigooda iyo weliba inta uu caruurta ka buuxinayo 18 sano.

Meeqa ayaad bixinaysaa?

Cadadka khidmada aad bixinayso waxa uu ku salaysan yahay daqligaadii u danbeeyey ee la canshuuray iyo inta caruur aad leedahay ee da'yar ah. Heerka ugu sareeya ee khidmada waxay la mid tahay sida kaalmada masruufka. Haddii aadan haysan, ama aad leedahay daqli aad u hooseeya, khidmadu waxa ay noqon kartaa eber kronor.

Si hay'adda adeega bulshada ay u xisaabiso khidmada waa inaad soo gudbisaa warbixinadda daqligaada.



Hadii aad doonayso inaad wax badan ogaato

Hadii aad qabto su'aalo kusaabsan khidmadda ama aad doonayso inaad wax badan ka ogaato sida howsha u dhacayso waxaad lasoo xiriiri kartaa gacan yaraha khidmada waalidiinta caruurta iyo dhalinta ee hay'adda adeega bulshada.

Warbixinta oo luqada kale ah, ka fiiri bogga internetka

Sharcigu muxuu ka leeyahay?

Hadii aad bedelkeeda aad doonayso inaad akhrisato waxa ay ka qabto sharci dejinta ee ku saabsan khidmadda waxad ka heli kartaa sharciyada soo socda:

- Koodka waalidiinta cut. 7 1§
- Sharciga adeega bulshada cut. 32 3 §
- Awaamiirta adeega bulshada cut. 17 3-5 §
- Koodka caymiska bulshada, cut. 18 iyo cut.19



JÄRFÄLLA

Järfälla Degmada

177 80 Järfälla

08-580 285 00

jarfalla.se